
# Cudarka Keena Ciladaha Neefsashada (RDS) ee Ilmaha yaryar

## Respiratory Distress Syndrome (RDS) Newborn (Somali)

Cudurka Keena Ciladaha Neefsashada (RDS) wuxuu ku dahacaa ilmaha dhasha waqti hore (dhiciska ah) ee aysan sambabadiisu si fiican u kobcin. Muddaba muddada ka horeysa ee ilmuhu dhasho asagoon gaarin bilihii loogu talagalay, wuxuu usii dhawaanayaa inuu ku dhaca cudurka RDS wuxuuna u baahan doonaa ogsijiin dheeraad ah oo ka caawiya neefsashada.

RDS wuxuu yimaadaa marka uusan ilmuhu carjawda (surfactant) badan ku lahayn sambabada. Carjawdu (Surfactant) waa dheecaan ku abuurma sambabada 26 asbuuc marka uu uurku gaaro. Intii ilmaha uurka jiifa koraayo, sambabadu waxay sameeyaan carjawyo badan.

Carjawdu waxay ku abuurmataa afka hawo mareenka sambababada waxayna ka caawisaa inuusan isku dhexdhicin (Sawirka 1 aad). Hawo mareenku waa inuu furan yahay si ogsijiinta kasoo baxaysa sambabada u gaarto dhiiga iyo koorboon dhaayogseedka kasoo baxa dhiiga kuna socda sambabada. Inkastoo cudurka RDS uu inta badan ku badan yahay ilmaha dhashay ayadoon la gaarin bilahooda, hadana ilmaha kale ee markaas dhasha ayaguna way qaadi karaan.




**Sawirka 1 aad** Carjawdu waxay hawo mareenada yaryar ee ku dhexjira sambabka ka dhigtaa kuwo furan.

Dadka halista ugu jira xanuunka waa:

- walaalaha qaba RDS

 ©2007, la muraajacay 2022, Nationwide Children's Hospital Sii socda…

- mataano ama ilmaha xiliyo kaladuwan dhashay
- dhalmada dhallitaanka (hooyada lagu qalo ilmaha)
- hooyada qabta cudurka sonkoroowga
- caabuq
- ilmaha xanuunsanaa marka uu dhashay
- qaboow, walaac, ama luminta heerkulka jirka. Ilmuhu ma joogteyn karo heerkulka jirka marka uu dhalanaayo.

## Astaamaha iyo calaamadaha

Ilmaha qaba RDS waxay muujin karaan astaamahaan:

- neef degdeg ah oo uu muujiyo ilmaha isla markiiba kadib marka uu dhasho
- Inuu sameeyo cod "ugh" ah markasta oo uu neefsanaayo
- isbadel ku yimaada bishimaha, faraha, iyo suulasha
- balaarashada (fuurida) duleelada sanka markasta ood neefsato
- cariiri ka jira xabadka – maqaarka ka koreeya lafta naaska iyo feeraha oo kor usoo kaca marka uu neefsanaayo

## Ogaanshaha Cudurka

Xanuunka waxaa la oggaadaa kadib marka la baaro ilmaha lana arko natiijada raajada iyo baaritaanada dhiiga.

## Daaweynta

- **Ogsijiinta** –Ilmaha qaba RDS waxay u baahan yihiin ogjisiin dheeraad ah. Waxaa loo siin karaa dhowr qaab:
  - tuubada Sanka: Tuubo yar oo leh cirbad ayaa laga gelin karaa sanka.
  - caadiska wanaagsan ee joogtada ah ee Hawo-mareenka (CPAP): Mashiinkaan waxa uu si degan hawada ama ogsijiinta ugu riixaa sambabada si uu u furo hawo mareenka.
  - qalabka hawo mareenka ee loogu talagalay cudurka (RDS ee daran): Kani waa mashiinka ilmaha yaryar ka caawiya inay neefsadaan marka aysan si fiican u neefsan karin ayagoon helin caawimaad. Tuubada neefsashada ayaa la geliyaa gudaha neefmareenada ilmaha yaryar. Kani waxaa loo yaqaan tuubada la geliyo

hawo mareenka (in too BAY shun). Ilmaha waxaa markaas kadib lagu xiraa qalabka neefta si uu oga caawiyo inay neefsadaan.

- **Dheecaanka Surfactant**– Dheecaanka Borootiinka waxaa ilmaha laga siin karaa sambabada si uu badel ugu noqdo waxa uusan haysan. Dheecaankaan waxaa si toos ah loogu siiyaa tuubada neefsashada ee lagu badelay tuubada hawo mareenka.
- **Daaweynta kanoolka (IV) daawada lagula duro Xididka** – Waa tuubo yar oo loo yaqaan tuubada dheecaanka (catheter), waxaana lagu rakibaa mid ama labo kamid ah xididada dhiiga ee xudunta. Sidaan waxaa sida ilmaha yaryar loo siiyo dheecaanka IV, nafaqada iyo daawooyinka. Tani waxaa sidoo kale loo adeegsadaa in dhiiga baaritaanka looga qaado.
- **Daawooyinka**– Mararka qaar daawada antiboodhiga ayaa la siiyaa haddii caabuq looga shakiyo. Daawooyinka ilmaha dejiya ayaa lasiin karaa si ay oga caawiyaan yareynta xanuunka xiliga daaweynta.

## Digniin

- Alaalada daawada ee tuubada ah waxay ku duub-duumi kartaa qoorta cunugaaga. Arrintaan waxay keeni kartaa in cunugu xiiqo (dhuunto ciriir noqoto) ama dhinto.
- HA OGA tagin tuubada daawada meel ilmaha yaryar ama carruurtu kasoo qaadan karaan ama gaari karaan.
- La hadal dhakhtarka cunuggaaga:
  - Haddii cunugaagu uu isku ceejiyo tuubada u xiran kahor.
  - Si aad u barato talaabooyinka aad qaadi karto si aad u caawiso aadna u hubiso in tuubadu aysan ku duumin qoorta cunugaagta, sida dhigida tuubada meel uusan gaarin cunuga inta ugu badan ee macquulka ah.
  - Walaacyo kale oo kasta ood ka qabi karto in ilmuhu isku ceejiyo aalada daawada ee tuubada ah.
- Haddii cunugaagu dhaawac ka qaado aalada daawada ee tuubada ah, fadlan caddeynta usoo gudbi FDA. Warbixintaadu waxay keeni kartaa xog gacan ka geysan karta in la hormariyo badqabka bukaanka. Webseedka lagu soo gudbiyo warbixinta waa https://www.accessdata.fda.gov/scripts/medwatch/index.cfm?action=reporting.home

## Waxa laga filan karo

Qaab uu ilmuhu usoo kabsanaayo way kaladuwan yihiin. Badanaa xanuunka RDS wuxuu noqdaa mid aad u daran kahor inta uusan soo roonaan. Qaar kamid ah ilmaha waxay u baahdaan ogsijiin badan marka loo eego kuwo kale. Qaar waxay u baahnaan karaan daaweynta carjawda barootiinada ah. Marka ilmuhu awood u yeesho inuu si fiican u neefsado, waxay u baahnaan karaan ogsijiin yar iyo caawimaad kale si looga caawiyo neefsashada.

## Sida loo oggaado in ilmahaagu yar uu soo kabsoonaayo

Halkaan waxaad ka helaysaa calaamado muujinaayo inuu canugaagu soo kabsanaayo: Waxay u:

- neefsan doonaan si fudud oo deganaan dheeraad ah leh waxayna u muuqan doonaan kuwo degan marka ay neefsanayaan.
- baahnaan doonaan ogsijiin yar.
- fariisan doonaan meel hoose ama gaaban, haddii ay isticmaalayaan qalabka CPAP ama qalabka neefsashada. Muddo kadib, caawimaada mashiinada waa laga kaaftoomi doonaa.